

Shimbir maalin ayey dab qaaday oo buulkeedii ayey ku gubtay



Foto: Christels/ Pixabay

Beri baa waxaa deris ahaa laba Shinbirood, Waxay lahaayeen laba buul oo waaweyn, iyagoo doonaya in ay ka ilaaliyaan carruurtooda dhaxanta, roobka iyo Cadceeda (qoraxda).

Si wanaagsan ayey u wada noolaan jireen, Waxaa nafta u keenay galey, oo markasta oo ay cunto carruurta u doonaanba u soo daba mara oo cuna ugxanta iyo carruurta yar yar ee aan duuli karin.

Shimbirhii mid ka mida ayaa fikirtey, waxay samaysana way garan weyday, Shinbirtu waligeed dagaal ma gelin mana jecla in ay dagaal gesho. Hase yeeshee waxay go'aan ku gaadhay in ay la dagaalanto

galeyarka oo ay ilmaheeda ka ceshato.

Shinbirtii waxay ogaatay in galeyarku ka xoog badan yahay markaa waxay doonatay dab si ay galeyarka iskaga celiso ugana aargoosato. Waxay soo qaaday, dab olol badan, markaas ayey gurigeedii la timi iyada oo dooneysa in ay galeyarka ku gubto dabka, Hase ahaatee wuxuu dabkii gubay buulkeedii, kii Shinbirta kale, iyo wixii u dhawaa oo dhan. Maahmaah Soomaaliyeed ayaa tidhaahda, "Shinbiri maalin ayey dab qaaday maalintiina min alley gubtay, dadka qaar ayaa maahmaahdanm u yaqaan, "shimbir maalin ayey dab qaaday oo buulkeedii ayey ku gubtay" labada maahmahoodba waa la isticmaalaa"

Dulucda sheekadan waa haddii aad sameyso waxa aadan aqoon ama waayo aragnimo aadan u lahayn dhibaato ayaa kaasoo gaadhi karta.

Laylis:

1. Waa maxay dulucda sheekadu?
2. Maxay shimiruhu ka tashadeen?
3. Maxaa ku dhacay shimbirihii?